

IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

رسمية



الجريدة

Sannadka 13aad Muqdisho 25 Maarso 1985 L. 2, n. 3

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO DAXA

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanaadka waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddeda waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey waxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qortitaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xaftiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA

KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA

LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 11 ee

20 Maarso 1985.

BOG I

Handwritten notes and stamps at the bottom of the page, including the word 'BOG I' and various illegible markings.

**XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 11 ee 20 Maar. 1985.**

**XEER GAAR AH.—**

**MADAXWEYNAHA JDS**

**MARKUU ARKAY:** Qod. 82aad iyo 83aad ee Dastuurka J.D.S.;

**MARKUU ARKAY:** Xeer Madaxweyne L. 51 ee 14.8.1982;

**MARKUU TIXGELIYEEY:** Xaaladda khatarta ah ee dibedda iyo gudaha uga imaan karta Dalka J.D.S. una sugnaatay baahida loo qabo in si degdeg ah loo sameeyo Xeer lagu ilaalinayo nabadgelyada, xasilloonaanta, midnimada iyo madaxbannaanida Qaranka Soomaalyieed;

**ISAGOO CUSKANAYA:** Awoodda ku xusan Qod. 83aad ee Dastuurka J.D.S.;

**KADDIB MARKUU:** La tashaday Guddiga Difaaca Qaranka ee J.D.S.

**WUXUU SOO SAARAYAA:** Xeerka soo socda:-

**Qod. laad**

**BAXSASHO**

Iyadoo la tixgeliyey in J.D.S. ay dagaal kula jirto qadawga, milliteri kasta oo ka baxsada Colka uu ka tirsan yahay waxaa lagu ciqaabayaa **DIL TOOGASHO AH**, haddii aannu ku soo gelin Colkiisa 45 maalmood dibexdooda, laga bilaabo taariikhda la faafiyo xeerkan.

**Qod. 2aad**

**HAYSASHO HUB SHARCI DARRO AH**

1. Qof kasta oo rayid ah oo lagu qabto isaga

haysta Hub, Saanad ama waxyaabaha wax lagu qarxiyo nooc kasta oo uu yahay (esplosivi) ama hub kiimika ah ama jeermi ah (batteriologica) waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH, haddii aannu si dhaqsi ah ugu geyn Ciidanka Nabadgelyada ee ugu dhow, kuwaas oo laga doonayo inay si degdeg ah ugu wareejiyaan hubka loo geeyey, Taliska tooska uga sarreeya.

2. Waxaa isla ciqaabtaas muteysanaya qof kasta oo rayid ah oo diida in uu dhiibo hubka lagu qabto ama is hortaaga ama handada Ciidammada Nabadgelyada ee loo xilsaaray ururinta hubka laga soo hadlay.

Qod. 3aad

SOO SHEEGID LA'AAN AMA GACAN KA GEYSASHO

QARIN HUB

1. Qof kasta oo ogaada in hub lagu qariyey meel ama ay haystaan dad aan ruqsad u haysan waxaa waaajib ku ah inuu wargeliyo Ciidammada Nabadgelyada. Haddii la warsado akhbaarta iyada ah ee uu diido in uu la shaqeeyo Ciidammada Nabadgelyada ee u xilsaaran soo ururinta hubka, waxaa laug ciqaabayaa xarig militeri oo ah 10 ilaa 15 (Toban iyo Shan) Sano.

2. Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qof kasta oo gacan ka geysta qarinta hubka laga soo hadlay.

Qod. 4aad

DEMBIYADA KALE EE AAN LAGU SHEEGIN  
XEERKAAN

Dhammaan falal dembiyeedka kale oo aan lagu tilmaamin xeerkan, waxaa lagu qaadayaa Qodobada ku saabsan oo ku yaal Xeerka Ciqaabta Ciidammada Nabadda iyo Dagaalka.

Qod. 5aad

**AWOODDA QAADISTA DACWADDA**

1. Awoodda qaadista dacwadaha xeerkan la xirii-  
ra waxaa iska leh Maxkamadaha C.Q.S. ee Dagaalka  
iyo Nabadda.

2. Maxkamadda C.Q.S. ee Muqdisho waxaa loo fi-  
diyey awoodda qaadista dacwooyinka ku saabsan Xeer-  
ka Ciqaabta Ciidammada ee Dagaalka.

Qod. 6aad

**LAALIS XEER**

Waxaa la laalay Xeerka lambarkiisu yahay 10 ee  
25 Febraayo 1985.

Qod. 7aad

**DHAQAN GELIN**

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 15 (Toban iyo  
Shan) maalmood kaddib marka lagu soo saaro Faafin-  
ta Rasmiiga ah ee Dawladda.-

Muqdisho, 20.3.1985

**MADAXWEYNAHA JDS**

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)